

# Ma doonaysaa inaad guriga joogto oo ay kaa tago Shaqaaqada?

AMARKA BADBAADINTA SHAQAAQADA QOYSKA  
(APPREHENDED DOMESTIC VIOLENCE ORDER)

## Waa maxay amarka ka saaridu?

Amarka ka saaridu wuxuu kuu ogolaanayaa inaad joogto guriga taas oo katirsan qayb ahaan Amarka Badbaadinta Shaqaaqada Qoyska (ADVO), iyo inuu ka saaro, ama ka kaxeeyo, qofka dagaalka wada.

Amarka ka saaridu waa mid ka mid ah shuruudaha lagu dalban karo ADVO.

Wuxuu ka mamnuuci karaa qofka shaqaaqada wada ku noolashaha guriga qofka la ilaalinayo.

## Tani miyey wax ii tareysaa aniga?

Ka hor intaadan dalban amarka ka saarida, waxaa jira su'aalo dhawr ah oo la rabo inaad isweydiiso:

1. Ma dareemi doontaa ammaan intaad tahay haddii aad guriga joogto?
2. Cabsi badan miyey ku heyn doontaa haddii uu ninkaagu yaqaan meeshaad degan tahay?
3. Ma doorbideysaa inaad guriga joogto oo uu tago qofka shaqaaqada wada?
4. Carruur ma leedahay, mana u fican tahay inay adiga guriga kula joogaan?
5. Ma awoodaa inaad bixiso kharashaadka guriga?

## Side baan ku heli karaa amarka ka saarida?

Garsooraha maxkamada ayaa sameyn kara amarka ka saarida haddii lagu soo codsado dalabka ADVO.

Waa muhiim inaad fursadaan kala hadasho qareen, shaqaalaha taageerada maxkamada ama sarkaalka boliiska markaad soo dalbaneysid ADVO.

Marmarka qaarkood, way wanaagsan tahay inaad hesho amarka ka saarida ka qaby ahaan Amarka Ku meelgaarka ah, ee boolisku dalban karo ka dib markuu dhaco shil dagaal.

## Maxaa khuseeya maxkamada si ay u sameyso amarka ka saarida?

Maxkamadu waxay tixgelinaysaa waxyaalo dhawr ah si ay u go'aamiso inay sameyso amarka ka saarida iyo in kale. Kuwaasina waa:

1. Ammaanka iyo ilaalinta qofka la ilaalinayo iyo wixii carruur ah ee ku nool guriga, haddii aan amarkan oo kale la sameyn
2. Wixii dhibaato ah ee uu keeni karo sameynta ama sameyn la'aanta amarka, gaar ahaan qofka la ilaalinayo iyo wixii carruur ah
3. Baahida hoyga ee dhammaan dhinacyada ay khuseyso, gaar ahaan qofka la ilaalinayo iyo wixii carruur ah, iyo
4. Wixii arinee kale ee khuseeya.

Xasuuso inaad u soo sheegtid booliska wixii jebiya amarka ka saarida.

## Had iyo jeer ka feker ammaankaaga

### Yaan la xiriiri karaa haddii aan caawimaad rabo?

Boliiska/Ambalaasta (Saddex Eber) 000	
Khadka Taleefanka ee Shaqaaqada Qoyska (Domestic Violence Line)	1800 656 463
Xarunta Dhibaataada Kufsiga ee NSW (NSW Rape Crisis Centre)	1800 424 017
Khadka Caawimaada Ilaalinta Ilmaha (FACS Child Protection Helpline)	13 21 11
Adeega Sharciga ee Dumarka NSW (Women's Legal Services NSW) Sydney	(02) 9749 5533
Sydney Wixii ka baxsan	1800 801 501

Adeega U doodista Shaqaaqada Qoyska (Domestic Violence Advocacy Service) Sydney	(02) 8745 6999
Sydney Wixii ka baxsan	1800 810 784
Hadlida Dumarka Soo galootiga ah (Immigrant Women's Speakout)	(02) 9635 8022
Khadka taleefanka caawimaada carruurta (Kids Helpline)	1800 551 800
Caawimaada Lacagta ee Centrelink (Financial Assistance Centrelink)	13 61 50

Adeega Turjumaada Qoraalka  
iyo Afka ee (TIS) 13 14 50

Saldhiga Booliska ee kuugu dhow ama  
Maxkamada Xaafadaada waxaa laga heli karaa  
xagga hore ee buugga taleefanada White Pages



Family &  
Community Services  
Community Services